Siyaasadda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka

Siyaasadda: Siyaasadda Biilka & Lacag Ururinta

Ujeedada: Cusbitaalada iyo dhakhaatiirta MaineHealth waa daryeelayaasha safka hore ee siiya daryeelka caafimaad ahaan habboon dhammaan dadka iyada oon loo eegayn awoodda ay iska bixin karaan kharashka. Cusbitaalada iyo dhakhaatiirtu waxay ka caawiyaan bukaanada inay helaan kaalmo dhaqaale oo ay ka helaan Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka, barnaamijyada dadwaynaha iyo khayraadyada kale markasta oo ay suurtogal tahay. MaineHealth waxay aqoonsan tahay inay tahay waajib inay siiso daryeel caafimaad bukaanada kaasi oo ay awoodaan iyo sidoo kale inay raacdo nidaamyada ganacsi ee saxda ah marka la eego bukaanada isdiidsiinaya inay lacagta iska bixiyaan.

Macluumaadka Guud

MaineHealth waxay ku dadaali doontaa inay kordhiso magdhawga cidda saddexaad mar kasta. Hase yeeshee, markii dhinaca saddexaad uu ku guuldaraysto inuu bixiyo kharashka adeegyada la qabtay oo dhammaystiran ama dhinaca saddexaad aanu jirin, waa inaanu xagga bukaanka ama dammiinka bukaanka u kacnaa si aanu lacagta uga helno.

Dhammaan baaqiyada bukaanada ee la ogyahay waxay tahay in la bixiyo markii adeegyada la qabanayo, haddii aanu bukaanku ahayn mid u qalma kaalmada dhaqaale ama mid u baahan adeegyada gurmadka. Bukaanada u qalma kaalmada dhaqaale ama kuwa adeegyadooda loo tixgaliyo xaalad gurmad ah lagama rabo inay lacagta oo dhan bixiyaan markii adeegyada la qabanayo Haddii bukaanku aanu awoodin inuu lacagta oo dhan bixiyo, MaineHealth waxay la samayn kartaa qorshe dhaqaale bukaanka. MaineHealth waxay bixisaa ikhtiyaarka qorshaha lacag-bixinta kaasi oo siinaya bukaanka inuu lacagta kolba in iska bixiyo.

A. Siinta Adeegyada Daryeelka Caafimaadka

Bixiyayaasha MaineHealth waxay qiimeeyaan siinta adeegyada daryeelka caafimaadka ee dhammaan bukaanada adeegyada soo doontay iyaga oon eegayn awoodooda lacag bixinta. Degdegnimada daawaynta ee calaamadaha bukaanka waxa go'aamin doona xirfadlayaal caafimaad iyagoo raacaya heerarka deegaanka ee ku-camalfalka, heerarka daryeelka caafimaadka qaranka iyo gobolka, iyo siyaasadaha iyo habraacyada shaqaalaha caafimaadka cusbitaalka. Waxa muhiim ah in la ogaado in kala saarista xaaladda caafimaad ee bukaanada looga dan leeyahay maaraynta caafimaadka oo kaliya, iyo in kala saaristan lagu xallinayo nidaamka ay tahay inay dhakhaatiirtu u arkaan bukaanada iyagoo eegaya calaamadaha caafimaad ee bukaanka. Kala saaristani ma sheegayso qiimaynaha caafimaad ee xaaladda caafimaadka bukaanada ee laga soo saaro baaritaanka ugu dambeeya. Cusbitaalada MaineHealth sidoo kale waxay raacaan Xeerka Daawaynta Caafimaadka Gurmadka iyo Foosha Firfircoon (Emergency Medical Treatment and Active Labor Act, EMTALA) ee fadaraalka iyagoo fulinaya baadhitaano caafimaad si loo go'aamiyo inay jirto xaalad caafimaad oo gurmad ah

markii sharcigu dhigayo.
Arrimaha caafimaad iyo dhaqaale iyo sidoo kale faa'idooyinka ay bixiyaan caymisyada gaarka loo leeyahay ama barnaamijyada dawladda ayaa saamayn kara wakhtiga, ama helitaanka, adeegyada daryeelka caafimaadka ee aan gurmaka ama degdegga ahayn (adeegyada xulasho). Adeegyada noocan ah dib ayaa loo dhigi karaa iyadoo lagu salaynayo la-tashi lala yeesho shaqaalaha caafimaadka cusbitaalka, haddii loo baahdo iyo haddii la heli karo bixiyaha daryeelka koowaad ee bukaanka. Bixiyayaasha MaineHealth waxa dhici karta inay diidaan inay bukaanka siiyaan adeegyada aan gurmadka ama degdegga ahayn marka ay dhacdo in bixiyayaashani ay awoodi waayaan inay aqoonsadaan meesha kharashka laga helayo ama mutaysiga barnaamijka kaalmada dhaqaale. Marka la eego bukaanada ay caymiyaan caymisyada gaarka loo leeyahay ama barnaamijyada dawladdu, doorashada bukaanka ee la xidhiidha siinta, iyo helitaanka, daryeelka waxa sida badan lagu qeexaa qorshaha caymiska ama tilmaamaha caymiska ee barnaamijyada dawladda. Bukaanada Medicare ee lagu arko goobaha dhakhtarku ka shaqeeyo ee MaineHealth waxa loo tixgaliyaa ku-camalfallada kusalaysan bixiyaha. Adeegyada la bixiyey waxa lagu dallici doonaa Medicare iyagoo ah adeegyada cusbitaalka ee bukaan-socodka.

Marka la eego bukaanada bilaa caymiska ah ama caymisku aanu ku fillayn, bixiyayaasha MaineHealth waxay kala shaqayn doonaan bukaanada inay helaan barnaamij kaalmo dhaqaale kaasi oo dabooli kara qayb ama gabi ahaan kharashka cusbitaalka ee aan la bixin. Bukaanada leh caymis gaar loo leeyahay, bixiyayaasha Maine Medical Center waa inay la shaqeeyaan bukaanka iyo caymiyuhuna si ay isugu dayaan inay aqoonsadaan adeegyada la dabooli karo marka la eego siyaasadda caymiska bukaanka. Maadaama bixiyayaasha MaineHealth ayna sida badan awoodin inay si dhakhso ah uga helaan macluumaadkan xagga cayimaha, bukaanka waajib ayaa ka saaran inuu isagu yaqaan adeegyada la dabooli doono kahor inta aanu soo doonanin adeegyada aan gurmadka ama degdegga ahayn.

1. ***<u>Adeegyada Daryeelka Gurmadka iyo Degdegga</u>***
   Bukaan kasta oo yimaadda MaineHealth waxa lagu qiimayn heerka adeegyada gurmadka ama degdegga ah iyada oon la eegayn aqoonsiga, caymiska, ama awoodda iska bixinta kharashka ee bukaanka.
2. ***<u>Adeegyada Heerka Gurmadka waxa kamid ah</u>***:
   Adeegyada caafimaad ahaan daruuriga ah ee la bixiyo kadib marka ay xaaladda caafimaad timid, ha noqoto mid jidheed ama maskaxeed, iyadoo ay sheegayaan astaamaha darnaantooda oo uu kujiro xanuun daran, taasi oo maqnaanshaha daryeel caafimaad oo dhakhso ah uu fili karo qof caadi ah kaasi oo aqoontiisa caafimaad dhexdhexaad tahay inay ku keeni karto caafimaadka qofka ama qof kale khatar, naafonimo halis ah shaqada jidhka ama talaxgab halis ah ee xubin jidhka kamid ah. Baadhista caafimaad iyo daawaynta ku xigta ee xaaladda caafimaadka gurmadka ah ee jirta ama adeeg kale oo noocan ah oo loo qabtay heerka uu dhigayo EMTALA-da fadaraalka waxay u qalantaa adeegga heerka gurmadka.
3. ***<u>Adeegyada Daryeelka Degdegga ah waxa kamid ah</u>***:
   Adeegyada caafimaad ahaan daruuriga ah ee la bixiyo kadib marka xaaladda caafimaad bilaabanto, ha noqoto mid jidheed ama maskaxeed, iyadoo sheegaysa astaamaha xanuunka

ah ee daran (oo uu kujiro xanuun daran) kuwaasi oo qof caadi ah uu rumaysan lahaa in maqnaanshaha daryeel caafimaad muddo 24 saacadood gudahood ah ay macquul tahay in la fisho inay keento: in qofka bukaanka ah uu khatar caafimaad galo, naafonimo soo gaadho shaqada jidhka, ama talaxgab xubin ama qayb jidhka kamid ah. Adeegyada Daryeelka Degdegga ah waxa la bixiyaa marka ay jiraan xaaladaha aan nolosha khatarta ku ahayn una lahayn khatar badan oo dhaawac halis ah leh inay soo gaadho caafimaadka qofka, laakiin adeegyo caafimaad oo dhakhso ah loo baahan yahay.

4. ***Shuruudaha Heerka EMTALA***:
   Sida shuruudaha fadaraalku dhigayaan, EMTALA waxay qabanaysaa qof kasta oo yimaadda cusbitaalka oo doonaya baadhitaan ama daawayn ah adeegyada heerka gurmadka (xaaladd caafimaad oo gurmad ah), ama kaasi oo soo gala waaxda gurmadka isagoo codsanaya baadhitaan ama daawayn xaalad caafimaad. Sida badan, dad aan ballan qabsan ayaa iska yimaadda waaxda gurmadka. Hase yeeshee, dadka aan ballanta qabsan ee codsanaya adeegyada gurmadka caafimaad iyagoo tagayo qayb kale oo bukaan-socod, rug caafimaad, ama meelo kale sidoo kale waxay keeni kartaa baadhis caafimaad oo gurmad ah marka la eego EMTALA. Baadhista iyo daawaynta xaaladaha caafimaad ee gurmadka ah ama wixii adeegyo noocan ah ee la qabto ilaa heerka loo baahan yahay sida ay dhigayso EMTALA, ayaa la siin doonaa bukaanka waxaana loo aqoonsan yahay daryeel gurmad ah. Go'aaminta inay jirto xaalad caafimaad oo gurmad ah waxa gaadha dhakhtarka baadhaya ama hawlwdeen kale oo caafimaad oo muctarif ah ee ka socdo cusbitaalka sida ku qoran diiwaanka caafimaad. Go'aaminta inay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah waxa gaadha dhakhtarka baadhaya ama hawlwdeen kale oo caafimaad oo muctarif ah ee ka socdo cusbitaalka sida ku qoran diiwaanka caafimaad.

5. ***Adeegyada Aan Gurmad, Degdeg Ahayn:***
   Marka la eego bukaanada (1) soo gala MaineHealth iyagoo raadinaya daryeel aan gurmad ama degdeg ahayn (2) raadinaya daryeel dheeraad ah kadib markii wax laga qabtay xaaladdii gurmadka ahayd, Maine Medical Center waxay siin kartaa adeegyada xulasho kadib markii ay la tashato shaqaalaha caafimaadka cusbitaalka Medical Center iyo dib-u-eegista ikhtiyaarada caymiska bukaanka. Adeegyada Xulashada: Adeegyada caafimaad ahaan daruuriga ah laakiin aan gaadhsiisnayn heerka adeegyada gurmadka ama degdegga ee kor ku xusan. Caadi ahaan, adeegyadan waa mid uun adeegyada daryeelka koowaad ama habraacyada caafimaad oo uu horey u sii ballansado bukaanka ama bixiyaha daryeelka caafimaad (cusbitaalka, xafiiska dhakhtarka).

6. ***Goobaha Ay Bukaanadu Iman Karaan***:
   Bukaanada oo dhan waxay awoodaan inay raadsadaan adeegyada heerka gurmadka iyo adeegyada daryeelka degdegga ah markii ay yimaadaan waaxaha gurmadka MaineHealth ama meelaha daryeelka degdegga ah loogu talogalay. Hase yeeshee, bukaanada leh xaalado gurmad iyo kuwa degdeg ah sidoo kale waxay iman karaan goob kale oo badan, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobnayn goobaha foosha iyo dhalmada, waaxyaha dheeraadka ah, rugaha cusbitaalka iyo meelaha kale. MaineHealth sidoo kale waxay ka bixisaa adeegyo xulasho oo kale dhammaan cusbitaalada, rugaha iyo goobaha kale ee bukaan-socodka.

B. Caymiska Dhinaca Saddexaad

Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka waxay ku dallici dhammaan dhinacyada saddexaad ee lacagta bukaanka bixinaya ama cidda masuulka ka ah markii ay keenaan macluumaadka daruuriga ah ee faa'idooyinkana lagu soo qoro xarunta. Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka waxay u kuurgali dhammaan lacagaha ku maqan cidda lacagta laga rabo kahor inta ayna bukaanka ama cidda ka masuulka ah ku dallicin.

Haddii bukaanku aanu bixinin macluumaadka caymiska wakhtiga adeegga, laakiin uu mar dambe soo hadlo si uu macluumadkan u bixiyo, kooxda adeegga macmiilka ayaa go'aamin doonta haddii aanu wali kujirno wakhtigii loo gudbin lahaa caymiska bukaanka. Haddii aanu wali ku jirno wakhtigii la gudbin lahaa waxaanu ku dari doonaa caymiska waananu dallici doonaa. Haddii ay dhaaftay wakhtigii loo gudbin lahaa cidda lacagta bixinaysa, MaineHealth lacagta ku dallici mayso caymiska bukaanka. Bukaanku wuxuu toos rafcaan uga qaadan marka la eego bixinta kharashkan shirkaddiisa caymiska. MaineHealth waxay kala shaqayn bukaanka hannaankan markii loo baahdo.

C. Soo Ururinta Kharashka Wadaagga ah

Dhammaan cusbitaalada, rugaha iyo dhakhaatiirta MaineHealth waxay si firfircoon u qaban kharash-wadaagta caymiska marka booqashooyinka ee inta lagu jiro wicitaanada adeegga hortii ama marka diiwaangalinta imaanshaha ama bixitaanka.

D. Siyaasadda Ururinta Lacagta

Markii lacag lagu leeyahay bukaanka, lacagta oo dhammaystiran ayaa had iyo jeer la codsadaa. Nidaamka ururinta lacagta qofku iska bixinayo waxay gaadhaa ilaa 120 iyo ka badan oo maalmood si loo hubiyo ku dhaqanka qaynuunka Gobolka iyo Fadaraalka, * **(fiiri shaxda wareegga bayaanka ee hoose)**. Waxa soo socdaa waa hannaanka lacag ururinta ee la raaco dhammaan lacagaha ku taagan dadka iyagu iska bixinaya kharashka.

1. Kolkii lacag taagani ay noqoto masuuliyadda bukaanka Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ayaa soosaari bayaan hore oo ku socda bukaanka ama dammiinka. Dhammaan bayaanada waxay u sheegi bukaanka in kaalmo dhaqaale ay jirto.
2. Bayaanada waxa la soo diri doonaa wareegga korodhka maalinta 29 (3) ama ilaa wixii baaqi ah oo taagan la bixiyo. Laba wicitaan oo taleefanka daba galka ah ayaa loo diri doonaa dammiinka qabo baaqiyada ka wayn $700.00 si la iskugu dayo in la helo lacagtaas ama looga kaalmeeyo bukaanka wixii kaalmo dhaqaale ah.
3. Haddii bayaanka bukaanku dib u soo noqoto iyadoon gaadhin halkii loo waday, waxa la isku dayi in la helo cinwaan kale, oonu galino nidaamkayaga oo ku hagaajin doonaa bayaanka cinwaanka habboon.
4. Bayaanka saddexaad ee ka soo baxaya nidaamkayaga biilka waxa ku qornaan doona farriin kama dambays ah oo bukaanka ama dammiinka ku socota. Haddii aanaan helin lacagta ama codsi kaalmo, xisaabta waxa loo gudbin doonaa heerkayaga xiga ee lacag soo ururinta.
5. Dhammaan dadaalada lacagta lagu soo ururinayo, iyo sidoo kale wixii waydiimo ah oo bukaanka ka yimid, waxa lagu xafidi kombiyuutarka nidaamka biilka waxaana la eegi karaa

markii loo baahdo.

6. Haddii bukaanka ama dammiinku uu ka jawaabi waayo waraaqahan ama wicitaanadan lacagta oo dhan lagu rabo, isagoo samaynaya qorshe lacag-bixin ama codsanaya kaalmo dhaqaale, xisaabta waxa loo gudbin doonaa hay'addayada soo ururinta lacagta si ay daba gal ugu sameyso.



E. Daymaha Raagay

MaineHealth waxay heshiis la gashaa hay'ad dibadda ka ah oo daymaha ururisa si ay uga kaalmayso soo ururinta lacagaha qofku iska bixinayo, oo ay kujiraan lacagaha bukaanku ka masuulka yahay ee aan la bixin kadib soosaarista bayaanka iyo ogaysiiska ugu dambeeya. Xisaabta waxa loo wareejin doonaa faylka daymaha raagay ee toddobaadlaha ah oo kaydka daymaha raagay ayaana la soo dallici Xisaabaha waxa loo tixgaliyaa daymo raagay markii la go'aamiyo in dhammaan dadaalada lacag soo ururinta la sameeyey.
Haddii bukaanka la ogaado inuu mutaystay barnaamijka kaalmada dhaqaalaha, MaineHealth waxay qaadi tallaabooyin ay dib uga joogsanayso hawlaha lacag ururinta ee ay bilawday.

Heshiiska MaineHealthee hay'adaha dibadda ka ah wuxuu u baahan yahay habraaca heerka ugu yar si loo go'aamiyo haddii xisaab ayna ahayn in lacag lagu soo qaado.

- Celcelis ahaan saddex ogaysiis oo qoraal ah ayaa la diri doonaa.
- Dhammaan xisaabaha waxa laga shaqeeyaa ilaa 120 maalmood ama ilaa xalka ugu dambeeya. Wicitaanada taleefanka ayaa la sameeyaa toddoba ilaa toban maalmood kasta kuwaasi oo loo diro akoontiyada lacagta laga doonayo.
- Xisaabta waxa loo diri doonaa 3 hay'adood oo waawayn oo xagga daymaha ah. Haddii baaqiga hay'adda loo diray ay ka yar tahay $50.00, loo sheegi maayo hay'adaha daymaha.

Kadib wixii dadaal ah markii la sameeyo xisaabta waxa lagu kaydin nidaamka hay'adda ururinta lacagta. Kahor dhammaadka sanad xisaabeedka MaineHealth, liis ayaa la siin dhammaan xisaabaha Medicare kaasi oo ay kujiraan liiska daymaha raagay ee loo gudbiyey Warbixinta Kharashka Medicare. Hay'adda dayn ururintu waxay intaa kadib ka saari doontaa nidaamkooda xisaabahan.

Siyaadahayaga ururinta daymaha bukaanada oo dhan waa iskugu mid. Bukaanada waxa laga baadhaa inay mutaysteen kaalmada dhaqaale kahor inta aan la bilaabin shaqada ururinta daynta. Haddii iyadoo halkaas la marayo, la helo waraaqo muujinaya in bukaanku uu mutaystay kaalmada dhaqaale laakiin aanu wali dalban, xisaabta waxa dib loogu soo celin dib-u-eegista kaalmada dhaqaale.

F. Busaarad

Haddii ogaysiis busaarad laga helo bukaanka ama dammiinka, MaineHealth waxay ku samayn hakin dhammaan xisaabaha buuxiya wakhtiga lagu sheegay ogaysiiska busaaradda. Maine Medical Center waxay la socon waraaqaha ka imanaya maxkamadda busaaradda si loo go'aamiyo haddii hanti jirto. Haddii la ogaado in hanti jirto foomamka cabashada ee habboon ayaa loo gudbin maxkamadda busaaradda.

G. Hantida Qofka Dhintay

Haddii dammiin dhintay lagu ogaado nidaamkayaga, xisaabaha waxa lagu calaamadin summad dhintay ah. Bayaanada bukaanka wali waxa laga soosaari nidaamka iyadoo loo dirayo "Hantida" dammiinka. Maine Medical Center waxay wada shaqayn la yeelatay adeeg-bixiye bukaanada dhinta iyo kiisaska dardaaranka. Fayl toddobaadle ah ayaa loo gudbiyaa adeeg-bixiyaha kaasi oo ka baadha hanti waafaqda Maraykanka oo dhan. Haddii la aqoonsado hanti uu leeyahay dammiinka dhintay, adeeg-bixiyaha ayaa bixin doonaa dhammaan macluumaadka loo baahan yahay si loogu dacdoodo hantida. MaineHealth waxay dib-u-eegi doontaa oo ansixin doontaa cabashadan hantida la dardaarmay waxayna gudbin dacwad ay ku doonayso hantida.

H. Dayn-bixinta

MaineHealth waxay dib-u-eegi codsiyada dayn-bixinta ee dammiinka iyo dhinacyada saddexaad, oo ka baxsan siyaasaddayada kaalmada dhaqaalaha ee wakhtigan, si kiis-calaa-kiis ah. Go'aamada dayn-bixinta waxa oggolaada ama diida Hoggaanka Xarunta jooga. Waxa jiri kara bandhigyo dayn-bixino oo ilaa ah 50% si loo bixiyo daynta raagtay ee uu ansixiyey RCM VP.

I. Cabashooyinka/Waydiimaha Bukaanka

Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka MaineHealth ayaa kala-mudnaan siin doona waydiimaha ka yimaadda bukaanadayada lana shaqayn doona waaxaha ku habboon si loo xalliyo wixii mashaakil ah kadib Siyaasadda iyo Habraaca Cabashada Bukaanka SBO.

J. Kaalmada Dhaqaale

MaineHealth waxay siisaa kaalmo dhaqaale (Free Care) bukaanada u qalma si ay uga kaalmayso iska bixinta kharashka qaarkii ee adeegyada caafimaad ahaan daruuriga ah ee aanu daboolin cidda saddexaad ee lacagta bixinaysa iyo dayn-wadaagta, dhidhaktibaliska iyo caymis-wadaagga adeegyada la daboolay. Go'aan mutaysi ayaa la qaadan markii bukaanka ama cidda masuulka ah ay dalbatay loona oggolaaday barnaamijka kaalmada dhaqaale kadib Siyaasadda Barnaamijka Daryeelka Bilaashka ah ee nidaamka oo dhan ee MaineHealth.

Ogaysiisyada jiritaanka kaalmada dhaqaale waxa lagu soo dhajin xarunta MaineHealth oo dhan iyo qaybta dhakhaatiirta. Sidoo kale waxa kujiri doona bayaanadayada bukaanka iyo waraaqaha CCI ee sare ku xusan qaybta B oo ku calaamadsan Iska Bixin.

Meelaha qaar ku yaala MaineHealth waxay heshiis la galeen Chamberlain Edmonds, (CEA), si ay u kaalmeeyaan bukaanada iyagu lacagta iska bixinaya inay codsadaan barnaamijyada gobolka ama fadaraalka ee ka caawin kara inay iska bixiyaan kharashka adeegyada cusbitaalka ama dhakhtarka. Maine Medical Center waxay hadda heshiis kula jirtaa CEA si ay u booqato dhammaan bukaan-jiifka iyagu lacagta iska bixinaya ee ku sugan Medical Center si ay u go'aamiyaan inay mutaysteen barnaamijyadan. CEA waxay sidoo kale kaalmayn nidaamka dalabka ee carruurta dhawaan dhashay iyo u-qalmiddooda MaineCare (Medicaid).

Haddii laguu oggolaaday kaalmada dhaqaale sida siyaasaddayadu dhigayso oo oggolaanshuhuna aanu daboolayn 100% kharashka adeegyada, lagaa qaadi maayo lacag dheeraad ah xaaladda gurmadka ama daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah, marka loo eego lacagta guud ahaan la soo dallaco, (amount generally billed, AGB), ee bukaanada caymiska leh. Maine Medical Center waxay dooratay inay isticmaasho Habka Dib Fiiri ee xisaabinta lacagta guud ahaan la dallacayo, (AGB), ee bukaanada dalbanaya kaalmada dhaqaale.

Macluumaadka la xidhiidha siyaasadda kaalmada dhaqaale ee MaineHealth waxa laga heli karaa websaytka cusbitaalada ama iyadoo lala xidhiidhayo waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka (207) 887-5100 ama wicitaanka bilaashka ah (866) 804-2499.

Oggolaanshaha heerarka masaxidda waxa lagu sheegay hoos si loo helo kaalmada dhaqaale:

$0.01	-	$1,000	Oggolaanshaha La-taliyaha Dhaqaalaha
$1,001	-	$5,000	Oggolaanshaha La-taliyaha Dhaqaalaha CBO
$5,001	-	$10,000	Maareeyaha Daymaha & Ururinta
$10,001	-	$50,000	Agaasimaha
$50,001	-	$100,000	Agaasimaha Guud ee Hawlgallada CBO
$100,001	–	Sare	VP-ga Wareegga Dakhliga & dhammaan waxa sare

K. Daahfurnaan

MaineHealth waa inay ogaysiiso bukaanada la filayo inuu cusbitaalku ku siin doono codsi qiime la qiyaasay ama qiimaha adeegyada la qaban doono.

Gudbi Jiritaanka Kaalmada Dhaqaale

- *Si Guud u Soo Bandhiga Siyaasadaha Biilashada iyo Ururinta Daymaha* - Cusbitaaladu waa inay soo bandhigaan iyo/ama ay ka dhigaan wax la heli karo siyaasadaha biilashada iyo ururinta daymaha, oo ay kujiraan qiime dhimista iyo siyaasadaha kaalmada dhaqaale. Goobaha la soo jeediyey waxa kamid noqon kara aagga diiwaangalinta bukaanka iyo websaytka cusbitaalka.
- *La Xidhiidhista Bukaanada* - Cusbitaaladu waa inay bixiyaan macluumaad ku saabsan siyaasadaha bushqadda diiwaangalinta bukaanka. Sidoo kale waxa lagu

boorinayaa in la-taliyayaashu gaadhsiiyaan siyaasadaha. Cusbitaaladu waa inay isku dayaan inay ka dhigaan macluumaadka qaar la heli karo muddada wareegga biilka iyo ururinta daynta.

- U gudbinta dadwaynaha kaalmada dhaqaale waa inay ku qoran tahay eraybixino macmiilku fahmi karo iyo luuqad uu bukaanku si fiican u fahmi karo.
- Macluumaad ayaa ku qornaan doona biilashada cusbitaalka oo kusaabsan jiritaanka kaalmada dhaqaale iyo sida loo helo macluumaad dheeraad ah loona dalbado barnaamijka.
- Macluumaadka siyaasadaha kaalmada dhaqaale waa in lagu dhejiyo meelaha dadwaynuhu ku kulmaan iyagoo leh tilmaamo sida loo dalbado ama loo helo macluumaad dheeraad ah.
- Bukaanada waa in la baro masuuliyadaha, daymaha ay dhici karto in lagu yeesho, mutaysigooda buuxinta waraaqaha mutaysiga iyo siyaasadda ururinta daynta cusbitaalka.

L. Fulinta

Waxbar oo tabobar shaqaalaha si loo buuxiyo filashooyinka cusbitaalka:

- MaineHealth waa inay siiso tabobar hawlwadeenada bukaanada la macaamila kaasi oo kusaabsan jiritaanka kaalmada dhaqaale, sida loo gaadhsiiyo jiritaankaasi bukaanada iyo sida loogu tilmaamo shaqaalaha kaalmada dhaqaalaha ee ku habboon.
- Shaqaalaha waa in la tabobari si ay si edaab, qarsoodi iyo yeelashada dareen dhaqan leh ugula dhaqmaan dalbadayaasha.
- Adeegyada tarjumaadda waa in la heli karo markii loo baahdo.

U maamulidda siyaasadaha kaalmada dhaqaale si caddaalad ah, qaddarin leh oo joogto ah:

- Siyaasaduhu waa inay noqdaan qaar macquul ah, sahlan, oo qaddarin leh oo sare u qaadaya helitaanka habboon ee daryeelka iyo ka faa'idaysiga masuulnimada leh ee adeegyada.
- Shuruudaha xagga waraaquhu waa inay noqdaan qaar sahlan xagga raacista, (tusaale, u baahan waraaqo sida waraaqaha mushaharka, cashuur celinta, bayaanada macaashka & khasaarah, iwm.)
- Maine Medical Center waa inay qaadato go'aano sax ah, wakhti ahaan habboon oo joogto ah.

N. Qorshayaasha Bixinta Lacagta

Bukaanada ama dhinacyada ka masuulka ah ee muujinaya dhibaato ka haysata inay bixiyaan daymaha (kadib ikhtiyaarada caymiska oo dhan) waxa la siin qorshe lacag-bixin oo bille ah. Shuruudaha qorshaha lacag-bixinta billaha ee MaineHealth waa $25.00 bishii ama 1/24 ee daynta ku taagan, siday doonto ha u badnaato eh. Haddii bukaanka ama cidda ka masuulka ah ayna awoodin inay buuxiyaan shuruudaha qorshaha lacag-bixinta billaha ah ee sare ku xusan,

waxay u baahan doonaan inay dhammaystiraan su'aalo xogururin oo dhaqaale oo ay ku doonayaan lacag-bixin bille ah oo ka hoose inta aanu rabno. Su'aalaha xog ururinta waxa dib u eegi doona Maareeyaha Guud ee Xafiiska Biilka Kaliga ah (SBO) si uu u ogaado inuu qorshuhu yahay mid lacag-bixin oo la aqbali karo xagga ururka iyo xagga bukaanka/cidda ka masuulka ah.

N. Hababka Lacag-bixinta

MaineHealth waxay u doonan dhinacyada saddexaad ee lacagta bixiya haddii bukaanku keeno macluumaad ku filan si loo go'aamiyo caymis iyo fayl garaysan sax ah ee sheegada. Dhidhaktibaliska, dayn-wadaagta, caymis-wadaagga iyo baaqiyada kale kadib caymiska waa masuuliyadda bukaanka ama cidda ka masuulka ah.

- ***Bixinta Lacagta Caddaanka ah*** Maine Medical Center waxay u baahan doontaa in biilka markii la soo dallaco uu bukaanka dhinac saddexaad aan lahayni uu wada bixiyo iyo/ama wixii ka soo hadha marka dhinaca saddex bixiyo iyo khidmadda guud. Dayn-wadaagtu waxay ku egtahay wakhtiga adeegga. Jeegagga shakhsi ahaaneed iyo money orders sidoo kale waa la aqbali karaa.
- ***Lacag-bixinta Kiridh Kaadhka*** Si ay ugu dhib yaraato bukaanadayada, MaineHealth waxay u aqbashaa American Express, Visa, MasterCard iyo kaadhadhka Discover wixii ah bixinta daymaha taagan.

O. Daymaha Wixii Dheeraada

Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ayaa celin doona daymaha wixii dheeraad ka ah kuwaasi oo ku yimid lacago dheeraad ah oo caymiyaha dhinaca saddexaad bixiyey waxaana loo celin cayimaha dhinaca saddexaad. Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka waxay ugu celin doontaa dhammaan wixii daymaha dheeraada bukaanka ama dhinaca ka masuulka ah taasi oo ku timi lacag dheeraad ah oo ay bixiyeen, taasi oo ka dhigan in dhammaan wixii dayn dhinacu ka masuul ahaa la wada bixiyey. Haddii ay jiraan xisaabo furan oo lagu leeyahay dhinaca masuulka ka ah, lacagta dheeraadka ah ee laga hayo waxa lagu gudi doonaa daymaha hore ugu taagnaa kahorta inta aan waxba loo celin. Xeerkan waxa ka reebban waa lacag-bixinaha HSA oo ka timid bukaanka taasi oo kaliya lagu gudi doono wakhti gaar ah sharci ahaan. MaineHealth ku gudi mayso baaqi ka soo hadhay daymaha xisaabaha kale ee furan haddii baaqiga ka taagan yahay taariikh adeeg oo ka baxsan wakhtigaasi

Lacagta la soo celiyo waxa si toddobaadle ah loogu soosaaraa qaybta Xisaabaadka AP ee MaineHealth.

DIB-U-EEGIS: Guddida Siyaasadda Hay'adeed:

Agaasimaha ka Masuulka ah: _____Taariikhda: _____

Agaasimaha Guud ee CBO

Oggolaanshaha VP/AVP: _____Taariikhda: _____

Wareegga Dakhliga ee VP